



**Si aad xaq ugu yeelato lacagta, waa inaad sameysaa
Codsiga Bixinta Manfaca.**

Waa goormaa marka aan sameyn karo Codsiga Bixinta Manfaca?

- Waxaad dooran kartaa inaad sameysid codsiga bixinta manfaca **todobaad kasta** ama **todobaad dhaaf**. Codsiga bixinta manfaca ee ugu horeeya waxaad sameyn kartaa hal todobaad **ama** laba todobaad kadib markaad buuxisid soona gudbisid arjiga manfaca.
- Waa muhim inaad codsatid manfac todobaad kasta ee aad shaqa la'aan tahay. Hadii aad seegto todobaad, waxaa dhici karta in aadan helin manfaca.

Sidee ayaan u sameynayaa Codsiga Bixinta Manfaca?

Raac **Tilmaanta Codsiga Bixinta Manfaca** ee hoose iyo **Jadwalka Codsiga Bixinta Manfaca** ee dhinaca kale warqaddan. Xusuuso in jadwalku kala duwanyahay hadii aad dooratid inaad isticmaashid teleefoonka halkii internet-ka.

- Hadii aad shaqeysay todobaadyada aad codsanaysid, waxaa lagu weydiin doonaa tirada saacadaha aad shaqeysay iyo dakhliga guud ee ku soo galay todobaad kasta.

Tilmaanta Codsiga Bixinta Manfaca	
Internet-ka www.uimn.org ▶	<ol style="list-style-type: none"> 1) Gal www.uimn.org kadibna riix <i>Applicant Login</i>. 2) Geli nambarkaada Social Security iyo Ereyga Sirta, riix Login. 3) Riix <i>Request Benefit Payment</i>. 4) Dhameystir akhbaarta lagaa codsaday.
Sistemka Teleefoonka iswada ▶	<ol style="list-style-type: none"> 1) Wac sistemka teleefoonka iswada: 651-296-3644 Magaalooyinka mataanaha 1-877-898-9090 Meelaha kale ee Minnesota 1-866-814-1252 TTY dadka dhegaha jiga 2) Dooro inaad maqashid luqada Ingriis, Isbaanish, Hmong ama Somaali. 3) Geli nambarkaada Social Security iyo Ereyga Sirta. 4) Dhageyso akhbaarta kadibna dooro xulashada <i>Codsiga Bixinta Manfaca</i>. 5) Jawaab ka bixi su'aalaha lagu weydiyey.

(waxuu ku idil yahay dhanka dambe)

Jadwalka Codsiga Bixinta Manfaca

Internet-ka www.uimn.org ►	Isniin– Jimca 6 a.m. to 6 p.m. Ma jirto xanibaad saaran namburada Social Security-ga hadii aad gashid internet-ka si aad u codsatid manfaca.	
Sistemka Teleefoonka iswada ►	Isniinta – Codsiga Bixinta Manfaca lagama heli karo sistemka teleefoonka iswada.	
	Haduu nambarka Social Security-gaada ku dhamaado 1, 3, 5	Wac talaada – 6 a.m. ilaa duhurki
	Haduu nambarka Social Security-gaada ku dhamaado 7, 9	Wac Talaada – duhurki ilaa 6 p.m.
	Haduu nambarka Social Security-gaada ku dhamaado 0, 2, 4	Wac Arbaca– 6 a.m. ilaa duhurki
	Haduu nambarka Social Security-gaada ku dhamaado 6, 8	Wac Arbaca – duhurki ilaa 6 p.m.
Dhamaan namburada Social Security-ga (hadii aad seegtay waqtiga jadwaadkaada).		Wac Khamiis iyo Jimca– 6 a.m. ilaa 6p.m.

Sistemka Self-Service wuxuu markiiba kuu bandhigaa akhbaarta akoonkaada wuxuuna kuu ogolaanaa inaad si deg deg ah ugu jawaabtid akhbaarta lagaa codsaday.

Qaar ka mid ah aaladaha Sistemka Self-Service:

- Mar kasta ee aad gashid (internetka ama teleefoonka), sistemka wuxuu kuu jiheyntaa waxa aad rabtid inaad sameysid.
- Markaad sameysid codisgaada manfaca, sistemka wuxuu kuu shegaa inta lacagtaada noqon doonto.
- Mar aad gashid (internetka ama teleefoonka), fariin kugu socota ayaa ku xusuusineysa akhbaarta muhimka ah ee u baahan inaad ogaatid.
- Hadii aad u baahantahay macluumaad dheeri ah, Su'aalaha Badanaa La Weydiiyo (Frequently Asked Questions-FAQs) iyo Jawaabaha ayaad ka heli kartaa khadka internet-ka iyo teleefoonka labaduba.

This information is available in an alternate format by calling the number at the bottom of this page.

Si tiene preguntas acerca de esta carta, favor de llamar a uno de los números escrito arriba.

Warkan waxaad ku heli kartaa nidaam kale adigoo soo waca nambarka ku qoran xagga hoose ee boggan.

Yog tias koj yuav xav tau cov lus no, kom raws li lwm txoj kev qhia los yog sau ua lwm yam lus, ces cia li hum us rau tus xov tooj saum toj ntawm daim ntawy no.